

Ka Qayb Gal BalantaadaKidCare Anywhere



1. 15 daqiiqo kahor balantaada daawaynta taleefanka, guji linkiga laguugu soo diray iimeelka ama fariinta qoraalka ah.

- Kaliya 1 ruux ayaa ku xidhmi kara oo booqanaya isaga oo adeegsanaya linkigan. Bixiyuhu waxa uu ku casuumi karaa qof kale marka booqashadu bilaabanto.


The image shows two side-by-side screenshots of an invitation email from KidCare Anywhere. The left screenshot shows a yellow button labeled 'ENTER WAITING ROOM' which is circled in pink. The right screenshot shows a URL (<https://patient.visitnow.org/a/HPiRvkmi>) which is also circled in pink. Both screenshots contain text in English and Spanish describing the online session and the patient's information.

2. Hadii aanad lasoo degin app-ka KidCare Anywhere, guji Download App oo raac tilmaamaha lasoo degida.


- Hadii aad hore ulasoo degtay app-ka, guji Open App.



Soo dejiso KidCare Anywhere App



Guji badhanka
Download App.





Guji GET ee ku taal app
store si aad usoo
dejisato app-ka
Children's Mercy
KidCare Anywhere.



<https://patient.visitnow.org/a/HPIRvkmi> You have been sent the following Children's Mercy KidCare Anywhere invitation which will allow you to attend an online session with your Provider in the department.

Kadib marka aad lasoo
degto app-ka, ku
noqo qoraalkaagii ama
iimeelkaagii oo guji
linkiga balanta.



App-ku waxa uu ku waydiin doonaa inuu galoo mikrifoona iyo kameerada. Guji badhan kasta oo guji OK. Raac tilmaamaha ilaa aad ka gaadhayso shaashada Check In.

Ka Qayb Gal BalantaadaKidCare Anywhere




3. Guji Check In.




4. Akhri macluumaadka ilmahaaga oo guji Confirm.



5. App-ku waxa uu tijaabin doonaa internetkaaga iyo kameeradaada. Wxa aad iska arki doontaa shaashada. Guji Proceed marka aad dhamayso tijaabada.




6. Wuxuu aad doontaa qaybta aad ku sugayso. Bixiyaha ayaa ku soo biiri doona markaa booqashadaada kadib marka uu eego macluumaadkaaga.
 - HA laabin ama ka tegin app-ka ilaa inta booqashadu dhamaanayso.




TILMAAMAH SOO HADALKA


- Kameerada iyo Mikrafoonka
 - Xaqiji in kameeradaada iyo mikrifoonaagu shidan yahay. Guji badhanka si aad u shido oo aad u bakhtiiso.



- Si aad ugu badasho kameeradaada hore u jeeda:
 1. Guji muujinta 3 dhibcood ee xaga hoose ee shaashada wakhtiga booqashada.



2. Guji Switch Camera.



- Waxa aad u diri kartaa fariin sheekeysi bixiyahaaga wakhtiga booqashada. Guji badhanka Chat si aad u furato wada sheekeysiga.
 - Qoro fariintaada iyo gurji Send.



- Si aad usoo dhamayso, guji badhanka End Call.
 - Hadii aad xidho taleefanka kahor inta aanad dhamaynin, waxa aad gujin kartaa linkiga iimeelkaaga ama fariinta qoraalka ah oo mar kale gal. Tani waxay kaliya shaqaysaa 5 daqiiqo gudaheed marka ay booqashadu dhamaato.



Cilad saarida


- Waxa i haysata mushkilad kameerada am mikrifoona ah.

Hadii aad lasoo degto app-ka KidCare Anywhere, waxa aad raacdaa tilmaamaha si aad u gasho ogolaanshaha buuxinta mikrifoona iyo kameerada.

1. Fur Settings.



2. Hoos u wad buuxinta app-ka oo guji KidCare Anywhere.




3. Xaqiji in badhanka ku xiga Mikrafoonka iyo Kameeradu uu shidan yahay.



Ma heli karo linkiga booqashadayda.

- Linkiga waxaa loo diray iimeelkaaga iyo taleefankaaga dhawr jeer kahor wakhtiga booqashadaada.
 - 24 saacadood kahor
 - 15 daqiiqo kahor
- Kaliya 1 ruux ayaa ku xidhmi kara oo booqanaya isaga oo adeegsanaya linkigan. Bixiyuhu waxa uu ku casuumi karaa qof kale marka booqashadu bilaabanto.
- Baadh "Visitnow" fariintaada ama iimeelkaaga
 - Waxaad ka eegtaa fooldharada Junk ama Spam



Wixii taageero farsamo ah, la hadal (816) 302-7895

Si aad balan kale u qabsato, la hadal (816) 234-3700